

2017
Qore Cabdiraxmaan maxamed ciise
Wakhti Tegay Tiigsi Maleh
Ha hiifin naftaadee
U hogaami guusha
CM

TUSMADA BUUGA

. Tusmo.....02
Hordhac.....05
. Hibeyn.....08
Mahadcelin.....09
Fiiro gaar ah.....10
Raaligalin.....10
1. Ku samir qadarka..... 10
1. Tixgalinta afkaarahaaga.....13
2. Tusaalooyin.....15
2. Ha hiifin naftaada.....16
1. Qodobo kaa illaalinaya hifka &rago beelka.....17
3. Weedha wakhtiga.....20
1. Islaamka.....23
2. Horumarinta wakhtigaaga.....25
3. Maareynta wakhtiga.....28
4. Illaasho wakhtiga aad haysato.....31

5. Qorshaynta wakhtiga.....36
1. Qor oo qaabee amuurahaaga.....37
2. U kala gur say u kala horeeyaan.....37
3. Qorshee usbuucaaga.....38
4. Ku dhaganow buug yarahaaga.....38
5. Baro inaad maya tiraahdo.....39
6. Inta aad falin ka fiirso.....39
7. Joogtee kobcinta aqoontaada.....40
8. Dib u qiimee xarakaadkaaga.....41
9. Calaamadi caadooyinkaaga liita.....42
10. Hayso himilo aad hiigsaneyso.....42
6. Xasilonida wakhtigu waa farxad.....43
1. Tusaalooyinka farxada.....44
2. Caqabadaha wakhtiga farxada.....47
7. Kalsoonida nafta.....54
1. Xirfada kalsoonida lagu dhiso.....62
8. Isbadalka nolosha.....64
1. Hadyad aan dhamaan.....72
2. Aragti fayow.....74

HORDHACA BUUGGA

Buuggan waxa qoray cabdiraxmaan maxamed ciise, waxa uuna xanbaarsanyahay tilmaamo, talooyin iyo tusaalayaal.
Waa buugg ay ku suntanyihiin aqoon diiniya iyo mid maadiya.
Waa buugg ay ku dheehanyihin qormooyin iyo qoraalo cajiba.
Waa buugg wanaagsan oo xigasho iyo kadaba qaadasho mudan waana buugg aqoontisa laga sooxigtay qoraaga buugga iyo illo aqoomeed lagu kalsoonyahay.
Waxuuna kaa caawinayaa qodob badan oo faa'ido u ah shaqsiyadaada

- In aadan ku hab saamin wakhtiga kaatagay ee kaalumay dheeldheel iyo ciyaar, markastana u hanqaltaagto sidii aad u maareyn lahyd wakhtiga soosocda kaas oon marnaba ku sugeyn.

- Waxa uu kugu dhiirigalayaa horumarinta naftaada iyo in aad guul gaadho, markasta ku dadaashid saas ugu sahay qaadan lahyd marinka ay kaa xigto gushu.

- Waxa uu kuu tilmaamaya sida looga faaideysto wakhtiga soosocda iyo sida loo maareeyo wakhtigaaga adiga oo raacaya sida ugu haboon ee looga faa'ideysto watiga.

- Waxa uu kaa hor istaagyaa inaadan isku hiifin isku ciilin aadan isticmaalin ereyada xunxun ee niyad jabiya qalbiyada dadka bini aadamka ah ee ah " maxaan saa u yeeli waayay ,maxaan saa u noqonwaydey iyo hadii arinku saa noqon lahaa saas Ayaan noqon lahaa "

Dhamaan buuggu waa mid kulleh ha isticmaalin ereyadaa waxakasta u daa amarka alle iyo wax qornaa.

Hadaba haddii aad akhrido buugga waxaad kamid noqon doontaa dadka kaguuleysta
Waxa ku xusan maraynta wakhtiga habka farxada loodhaliyo iyo waliba siyaabaha logu kalsoonaado shaqsiyadada iyo naftaada
Waxaa ku qoran hab kasta oo loo dhiirigalyo qofka doonaya in uu wakhtigiisa ka faaideyto iyo habka loo dhiirigaliyo qof waxqtigisa iska qoomameyay kuna so laastay dheel iyo niyad jab.

Hadab hadi aad tahy akhriste ka faaideyso una faa'idee naftaada

Bugan ama dhiganahani waxa uu iskugu jiraa xikmado kusaabsan wakhtiga, nolasha iyo dhiirigalin kar uqaadaya shaqsiyadaada.
Sidoo kale waxaan ka maqneyn qoraalo iyo halqabsi si dhab ah u taabanaya wakhtiga iyo horumarinta shaqasiyada.

HIBEYN

Buugaygan ama dhiganahan waxaan u hibeeyay labadeyda waalid aabo maxamed ciise maxamuud iyo hooyo faadumo xuseen cali oo ah waalidkay aan aduunka ugu jeclahy ayaga dartood Ayaan ugaadhsiinayaa dhamaan cidkasta oo afka soomaaliga ku hadasha iyo cidkasta oo jecel horumarinta shaqsiyadooda, inta wanaaga, samaanta iyo samiinta jecel

MAHAD CELIN

Mahad oo dhami waxay usugnaatay Allah qafuuru raxiimka ah, allah uunka oo dhan iska leh, allah ii fududeeyay inaan qoro buugan ka hadlaya maareyntaiyo illaalinta wakhtiga, horumarinta iyo dhiirigalinta shaqsiga ee magaciisu yahay wakhti tagay tiigsi maleh.

Intaas kadib waxaan u mahad celinayaa cidkasta oo gacan ka gaysatay inaan qoro buugan had iyo jeerna igu taageeray wax kasta oon uuga baahdo.
Iguna dhiirigaliyey iguna garabgashay inaan wax qoro waxan usoo badhigo dadka jecel wax akhriska iyo inay helaan wax kamaqnaa ,
Sigaara waxaan ugu mahad celinayaa aqoonyahan maxamed cabdiqaadir daa'uud (stanza) oo ah qoraa abwaan ahna bare katirsan barayaasha jamacada nugaal

FIIRO GAAR AH

Buugan waxaa isticmaali Kara oo akhrin kara qof kasta oo uu soogaadhay xiiseyn gaar ahna u haya akhriska iyo horumarinta shaqsiyadiisa.
Fadlan ha u isticmaalin sifo aan habooneyn illaalina xuquuqda iyo qalinka buuga meelkasta ood u isticmaaleyso qoraalkan.

RAALI GALIN

Waxaan cidkasta ka raali galinayaa wax kasta oo khalad ah oy ku arkaan dhiganahan in ay soogudbiyaan.
Ma gafe ma khaldame waa allaah Waxaynu nahy ibnu aadam gafna ina seegi maayo

1

KU SAMIR QADARKA

Way dhacdaa adigoon raali ka ahyn ama jecleyn in aad guul daraysato sababtu ma aha mid adi kaatimi ee waa mid alle ugu talagalay micna ha laga leeyahayna tahy in aad ku cimra qaadato naftaadana ka qoomamayn. Qoomamada iyo naftaada ood dhaleeco iyo hiif la daba gashaa waxay hodaa guulo badan ood gaarilahyd, wakhti badan ood kafaa'ideysan lahyd iyo farxad badan ood qaadan lahyd.

Waatagay wakhtigaasi balse waxaa kusugaya in aad tahy qof bili aadam ah, haysta diinta islaamka una nool in uu alle caabudo wax kasta oo koonka kadhacayna rumeey una daayo alle.

Hadaba waad maqli waad arki Oraah walbana maalin bey dhegahaaga ku soo dhecdaa hase ahaatee isla maalintaas waxaa laga yaabaa ineysan ku quseyn ama aysan macno gaar ah kuu laheyn laakiin dadkeenna Soomaaliyeed oo ku amaanan maah-maahda iyo

macnaha fog ay xambaarsan tahay waxaa hubaal ah xaalad kastoo aad ku jirto inaad ka heleyso qaar macno kuu lahaankara.

Aniga maanta igama ahan inaan qoomamo jooga waayo diinta Islaamka ee aan heysto ayaa ogoleyn inaan shalaayo oo aan dhibsado qadarta Allah, nabigeennu {Nabad galyo iyo naxariis korkiisa Allah ha yeelee} wuxuu nasoo gaarsiiyay xadiis macnihiisu yahay
"Sidaa hadii aan yeeli lahaa waxay ka mid tahay acmaasha Sheydaanka**".**

Allah subxaanahu watacaalaa waa tuu Quraanka ku leeyahay "Tashan meysaan ilaa Ilaahayna wuu tashan, Allaha caalamka oo dhan rabiga u ah", al-cumuum waxaan
Uga jeedaa qof kasta qadarta haku samro, teeda xun iyo teeda wanaagsan.

Waayo tani waxay gaashaan nooga noqon kartaa inaan nafteenna dilno, goyno, ciqaabno, is-ciil kaabno, waana dhaqan laga soo gaaray gaalada oo aan heysan Diin sax ah Ilaahay baa mahad leh.

Runtii xanuun baan dareemayaa laakiin dawadiisu maahan catow iyo qeylo aan isla taago Taasoo aan is-beddel ku keeni Karin qadarta Allah, laakiin waan samrayaa ilaa abaal marka aan ka helo Allah Subxaanahu watacaalaa

Waa marxalad ay adag tahay in aad si badheedh ah aad u waajahdid aan ahayn in aad tahay qof hamigiisu halkaa galay, waana marxalad waji gabax ku ah indhaha aan arkaayo inay kasii ifayaan meel fog oo nacfi daran.

Waa cidlo aan weheshi lahayn dad ajaanib ah oo aad marxalad kuwada jirtaan mooyaane, waaa ciirsi la'a aan lahayn cid aad u cabataa iyo cid ku garab gashaba, waxkasta oo kugu dhacaa waa galabsigaa.

Nin qoyani biyo iskama dhawree, fikirka da'yarteenu waa kuwo inbadan markay ku dhacaan hamuunyooyinkiisa ku sii adkaysta inay ku calool adaygaan iyagoo dareensan dhibaatada ay qabaan iyo noloshay ku nool yihiin oo ah mid liidata, arrinkoodu waa "shull iyo shall" oo ah samaan iyo xumaan miday doonto ha noqotee go'aankaaga ka sal gaadh.

In aanad go'aankaaga fullin kartaa waa mid loo bahan yahay maxayeelay go'aan aan ku meel mar lahayni waa sida geed aan midho san lahayn, laakinse waxaa loo bahan yahay inaad markasta taxliilaad ku sameyso afkaarahaaga, sida;

TIXGALINTA AFKAARAHAAGA

1. Inaad markasta ahaato qof qayb kasta oo nolosha ka mid ah markuu soo waajaho kala tashada dad uga waayo-aragasan maarxaladaas, waayo waa mid kaa caawin karta inaad dib u sixi karto dal daloolada afkaarahaaga qaarkood.

2. Inaad ahaato markasta qof qaab dhismeedkiisa nololeed qaabeyn kara iyadna waa mid lagaaga baahan yahay si aad isu ogaato heerka aaad taagan tahay
3. Inaad ahaato qof noloshiisa hanan kara waa mid muhiimad gaar ah ku leh hadaad rabto isbeddel inaad ku abuurto wakhtigaaga waayo qofba intuu noloshiisa hanto ayuu helaa midhaheeda, qofna intuu habradduu helaa hadimadeeda. “Ogow alle cidna ma dayaco”.
4. Inaad noqoto qof daqiiqad kasta oo noloshiisa ka mid ah bakhayl ku ah waa mid aad wax kaga geddin karto waayahaaga nololeed maxayeellay ilbiniqsi kasta oo noloshaada kaa luma waa mid aan soo noqod lahayn

5. Ahaw qof aaminsan inuu fikiradiisa ka midho dhalin karo xitaa adigoo dhaqaale ahaan liita waayo maskaxbaa soo saarta dhaqaale.

Waa qadar alle in aan noloshayda kolba qaab ugu noolaado, waayo waa wax qornaa jiraal ahaan, gaadhi maysid meel aan lagu idmin ka gaabin maysid meel lagu idmay xaalku waa qalin alle xukunkii iyo meeshu ku geeyo.

Waa xaqiiq jirta inay noloshuba ay tahay mid aan dhaafin wixii loo qadaray iyo imtaxaankiisa, laakinse maaha in xumaan kasta ama falkasta oo xad-gudub ah loo nisbeeyo ALLE Lana yidhaahdo waa qadar alle.

Mana aha in aad noloshaada dayacdo adigoo Og ficilada aad sameynayso waxay yihiiin iyo khaladaadkoodaba, taasina ay tahay mid dhadhankeedu kugu hayo murugo aanad ka ladayn, hadaba si aad xanuunkaa u ilowdo waxaad naftaada ku samir siisaa nisbeyn aad u nisbeynayso khaladaad kaagi inay ahayeen qadar alle.

Tusaale

Waxaad tahay shaqaale ka hawl gala shirkadaha waa weyn ee ka hawl gala dalkeena sida xawaaladaha, kuwa dhismaha iyo isgaadhsiin taba iwm, waxaad tahay qasnaji haye, waaxdani waa ubucda dhaqaale ee ay shirkadaasi leedahay, waxaa lagaaga baahan yahay inaad noqoto qof soo jeeda oo feejigan, khaladka yare ee aad gashaa waa mid dhaawac u geysan kara hanaanka horru socod ahaaneed ee shirkadaas, Bal ka waran haddii aad baylihisu ma qadar allaa mise sababteedaad lahayd inaad la timaado dayacaas ku dhacay shirkadaas iyo dhaqaale lunkaas.

Noloshu ma gasho khamaar iyo tijaabo ku dhimo ama ha ku dhiman, allena maaha mid xumaan u qalma in loo nisbeeyo, waxaanse markasta ku leeyahay

Alle uma qalmo nibeynaha xumaantaada ee ahaw qof ka rajeeya allihiisii rajadiisa aan quustaba lahayn inad ka dhaimato mooyeee.

2

HA HIIFIN NAFTAADA

Ha ciilin ha hiifin hana rajo beelin hankaaga himiladaada iyo guusha aad dooneyso Wakhtiga kaatagay ku cimro qaado balse haka qoomamayn yuusan kaa hor istaagin hamiga rajada iyo hanka aad leedahy.

Iskdey inaad dhaqan galiso wax kasta ood ku badbaaninkarto kana fogaato inaad naftaada dhaleeceyso

U horseed marinka guul darada hana ku laylyin rajo xumo iyo hanyari.

QODOBO KAA ILLAALINAYA HIIFKA IYO RAJO BEELKA

Fikirado qaldan, Hab socod aan haboonayn, caadooyin, dhaqanno, dhibaatooyin nafsiyadeed iyo qaar bulsho ba.

Waxyaabo badan ayaa dhibaato inoo horseeda inagoon ogsoonayn, sidaa awgeed ayaan akhristayaasheenna sharafta mudan usoo uruurinay arimo ay tahay hadii aad ku guda jirtid ama samaynaysidba inaad faraha kala baxdo isla markaana markiiba joojiso sababtoo ah adiga ayay dhibaato kugu tahay, noloshaadana burburinaysaa.

1. Jooji wakhtiga aad la qaadanaysid dadka aan ku haboonayn inaad wakhti la wadaagtid, una fiicnayn sharaftaada iyo maqaamkaaga.

2. Jooji ka cararka iyo orodka aad ka ordeysid dhibaatooyinkaaga.

3. Jooji beenta aad ku maaweelisid naftaada.

4. Jooji isku dayga aad isku dayaysid inaad cid kale noqotid.

5. Jooji iskdu dayga aad isku dayaysid inaad soo celisid wax tagay ama galbaday.

6. Jooji canaanta aad naftaada ku canaanatid gafaf aad wakhti hore gashay.

7. Jooji cabsida aad ka qabtid inaad khaldanto, waayo waxay kaa hor istaagaysaa horumarka.

8. Jooji caajiska, haku talax tagin fikirka si aanaad u samaysan dhibaatoyin aan meesha oolin.

9. Jooji filashada aad is leedahay isbadal uma diyaar tihid, waayo qofna ma dareemo inuu isbadal diyaar u yahay 100% ilaa uu ay fursadu u timaado, sug fursadaada.

10. Jooji diidmada xidhiidho cusub oo aad dadka la samaysid, adigoo ka cabsanaya sidii kuwii hore inay u fashilmaan.
11. Jooji xinka aad dadka kale xinninaysid.

12. Jooji doorashada arimaha fudud een wax dadaal ah u baahnayn, ha qaadan dariiqa fudud, isku day inaad samaysid wax aan san caadi ahayn.
13. Jooji canaanta aad dadka ku canaanatid wax aad adiguba samaysid.

14. Jooji warwarka badan iyadoon wax warwar keenaaba jirin.

15. Dhabanka gacanta ka qaad oo ilaahay ugu mahad naq xaalad kaste ood ku jirtid, mid xun iyo mid sanba isaga ayuun baa kaa saari karee.

3

WEEDHA WAKHTIGA

“Hammi ama Han sare oo aad yeelatay waxa ay sabab u noqdeen in aad hadaf dajisato. Hadafkaasina waxa uu sabab u noqday in aad wakhtigaaga maareyso. Wakhtigaaga oo aad maareysay ayaa ah sababta koowaad ee guushaada".

Wakhtigu waa waxa ugu qaalisan ee aynu haysano waxaana la odhan karaa waaba nolasheennii. Wakhti kasta oo tagaa qayb adiga kaa mid ah ayuu la tagaa, wakhtigu degdeg ayuu kugu dhaafaa mana soo laabto.

Murti: Soomliduna waxay tidhaa“Wakhti iyo mawjad midna kuma sugaan”.

Murti kale oo soomaliyeed ayaa ahayd saddex masoo laabtaan:

1. Odhaah aad tidhi

2. Falaadh aad gantay iyo

3. Wakhti kaa tagay.

Waxa aad arkaysaa marar badan dad ku andacoonaaya ama ku doodaaya wakhti ma haysto, wakhtigaa igu yar, mashquul ayaan ahay iyo wax la mid ah, ama qof leh markaan jaanis helo ayaan waxaa sameyn doonaa, ama qaban doonaa. Dhibku maaha in uu wakhtigu ku yarhay laakiin uma nidaamsanaa wakhtigu taas ayaa keenaysa in uu isku arko mashquul markasta. Markaynu sidaa leennahay waxaa suura gal ah qaarkeen in aysan wax muhiim ah hayn oo ay ku jiraan sheeko ama wax kaloo liita…

Abwaan Cismaan Yuusuf Keenadiid (AHN)

ayaa yidhi:

“Aduunyda caawiyo maalin weys ciribinaayaane

Cabbaarkii yaree kaa tagaa waa cad kaa go’ane

Cimrigaan gabaabsiga noqdeye sii ciriiri-yoobey

Camalfalasho wixii aan ahayn kagama ciil beeshid”

Gacanteena ayaynu ku dilnaa oo aynu ku aasnaa wakhtigeenna qaaliga ah goor walba, waxa aynu ku bixinaa muddo aad u badan oo bilaa nidaam ah daawashada TV-ga, isticmaalka Internet-ka, ku hadalka Talefoonka iyo waxyaabo la mid ah…

Islaamka:

Innagoo Og diintu sida ay uga hadashay: Bal u fiirso siduu illaahay Qur'aankiisa ugu dhaarto qaybo ka mid ah wakhtiga sida habeenka, iyo subaxa. Ilaahay wuxuu kaga hadlay Qur'aankiisa kariimka ah sida ay maalinta iyo habeenku isku bad-badalaan, siduu midna uga dhigay iftiin midna mugdi iyo ayaadkiisa in lagu cibro qaato mudan inay ka mid yihiin. Xikmadda ku jirtaa maaha inay dhayal kugu dhaafaan ee waa mid mudan in siday tahay looga faa'iideysto adduun iyo aakhiraba oo ah siduu illaahay ugu tala galay. Nidaami oo maamulo wakhtigaaga kolba sida ugu haboon adoo u eegaaya nolashaada iyo arimahaaga kuu gaarka ah.

Sidoo kale weydiimaha ugu horeeya ee ruux kasta inta aanu lug qaadin la su'aali doono Qiyaamaha waxa ka mid ah: maxaad kusoo qaadatay cumrigaagii iyo dhallinyara nimadaadii. Wakhtigu waa cumrigaagii. Cimrigaaguna wuxuu ka koobanyahay daqiiqadihii, saacadihii, bilihii iyo sanaddadii kusoo maray nolashaada.

Nabigeenii suubanaa ayaa xadiis shariif ah inoogu sheegay:

Waxa jira laba nimco oo ay dadku badi haystaan waana “caafimaadka iyo wakhtiga”.

Horumarinta wakhtiga:

Qiimaha wakhtigu waa sida birta xadiidkaa oo kale; Markasta oo aad birta aad galiso juhdi iyo dadaal si aad uga dhigto mid wax tar leh, waa mar kasta oo qiimaheedu kordho! Tusaale ahaan: Biraha qaar waxaa laga dhigaa middiyo, qaar saacado, qaar waxyaabaha ay dumarku xidhaan, qaar guryaha lagu dhistaa. Qiimaha birtu wuu kordhayaa mar kastoo qaabka birta iyo wax tarkeeda la kordhiyaba. Wakhtiguna waa sidaas oo kale, qiimihiisu wuxuu ku jiraa habka aad juhdi u galisid nidaamkiisa iyo maamulkiisa isla markaana aad uga faa'iideysato.

Horumarka dad sameeyaan iyo xaddaaradahoodu waxa ay ku xidhantahay kuna yimaddeen sida ay wakhtiga u isticmaalaan, u maamushaan, ugana Faa'iideystaan . Dib udhaca kuwa kalana waxa uu ku yimid sida ay wakhtigooda u dayacaan. Qof kasta oo inaga mid ahi wuxuu haystaa 24(afar iyo labaatan) saacadood maalintii.

Keena faqiirka ah, ka taajirka ah, ka faraxsan, ka murugeysan, keena yar iyo keena weyn intuba. Waxaa kaliya oo aynu ku kala duwanahay habka iyo sida aynu u isticmaalno ugana faa'iideysanno wakhtigeenna qaaliga ah.

Tusaale: Maalin maalmaha ka mid ah ayaa nin socoto ah ayaa arkay nin xaaboole ah oo shaqadiisii xaabo gurida ku jira oo geed saaran. Ninka xaaboolaha ah gudinta uu geedka xaabada kaga goosanaaya Af ma leh ama ma lisnaa. Ninkii socotada ahaa ayaa ku yidhi “waar gudinta aad ku shaqeynayso maad iska afeysid”. Wuxuu ugu jawaabay xaaboolihii “wakhti aan gudinta ku liso ama ku afeeyo ma hayo soodigan arkaaya in aan mashquul ahay”

Bal u fiirso sheekadan;

maanta oo dhan geedkaa ayuu jaftaa ku hayaa oo wax aad xaabo ka dhigatid ka gooso ayuu is leeyahay , dadaal iyo juhdi badanna wuu galiyay.

Haddana wax yar oo aan naf lahayn ayuu kala carraabaa galabtii. Haddii uu gudinta iska afeyn lahaa xaabo badan ayuu ku goosan lahaa muddo yar.

Wakhtigan uu leeyahay ma hayo oo mashquul ayaan ahayna wax badan ayaa usoo hadhi lahaa oo uu dano kale ku qabsado.

Sidaas oo kale Wakhtigaaga oo aad habeysay waa gudintaa xaabada aad ku goosanaysay oo aad afeysay.

Wakhtigaaga oo aad maamushaa waa adigoo muddo yar wax badan ku qabsaday. Wakhtigaaga oo aan nidaamsaneynna (bilaa nidaam ahina) waa adiga oo wakhti aad u badan wax yar oo aan naf lahayn ku qabsaday amaba aan waxbaba qabsan. Wax soo saarkeenna wanaagsan ee qof ahaaneed iyo bulsho ahaaneedba wuxuu ku jiraa wakhtigeenna oo aynu ka faa'iideysanno oo aynu maareynno.

Maareyn wakhtiga

Maareynta wakhtigu waxa ay ku xidhantahay himilada iyo hiraalka aad nolasha ka leedahay. Haddii aanaad hadaf dhaw iyo mid fog toona lahay wax macna leh kuuma sameynayso in aad maamusho ama nidaamiso wakhtigaaga. Marka nolashaadu nidaamsantahay yool-na

aad leedahay isla markaana sidii aad u xaqiijin lahayd aad ku guda jirtid Wakhtigaagu wuu wanaagsanaanayaa waxa aanaad noqonaysaa qof ka faa'iideystay. Laakiin haddii aanaad nolasha wax hadaf ah ka lahayn waxaaguna ay iska yihiin caadi iyo caado, himmiladaaduna anay dhaafsanayn cunno, hurdo iyo shaqo; way adagtay in wakhtiga si fiican aad uga faa'iideysato una maareyso. Si haddaba wakhtiga aad uga faa'iideysato marka hore waa in aad leedahay yool fog iyo mid dhaw intaba. Guusha iyo farxadda aad raadinaysaana waxa ay ku jiraan sida aad wakhtiga u adeegsato.

Nolashu waxay i bartay: saddex xaaladood mid uun inuu wakhtigu kugusoo maro:

1. Mar uu kugu yaryahay
2. Mar uu kugu badanyahay iyo
3. Mar uu Baraka badanyahay

- Marka uu kugu yaryahay waxa aad isku deyday in aad wakhtiga ka faa'ideysato, nolashana hadaf ayaad ka leedahay oo aad jeceshahay in aad xaqiijiso. Laakiin habka wakhtiga aad u maamushay iyo hannaanka aad himmilada u dajisay ayay wax ka qaldanyihiin.
- Marka uu kugu dheeryahay. Wax hadaf ah oo aad rabto in aad ka midha dhalisaa ma jiro. Sidaa daraadeed waxa aad isku dayi in uu wakhtigu dhakhso kuu dhaafo oo aad lumiso.
- Marka uu barakeysanyahay. Waxbaad hiigsanaysaa. Jidkeediina waad haysaa. Kaas oo ah Himmilo sugan iyo hammi sare oo aad yagleeshay iyo si wanaagsan oo aad u maareysay wakhtigii ugana faa'iideysatay. .

Ibinu qayim: Illaahay ha u ha naxariistee ayaa waxa uu yidhi: "Wakhtiga oo lumaa dhimashada ayuu ka xunyahay, sababta oo ah wakhtiga kaa lumaa wuxuu kaa

fogeeyaa Illaahay iyo aakhiro, dhimashadu se wuxuun bay kaa fogeyn adduunka iyo ehelka". Isku day in aad wakhti yar wax badan ku qabatid, isla markaana aad ahaatid mid

Aqoon badan u leh sida loo maamulo wakhtiga iyo sida looga faa'ideysto labadaba.

Ugu danbeyntii: wakhtigiiba hadlaaya oo leh "ilma bini aadamaw anigu waxaan ahay maalintii cusbeyd ee

Shaqadaada markhaatiga ka ahayd ee iga faa'iideyso maxaa yeelay dib uma soo laaban doono ilaa maalinta qiyaamah.

sidaa daraadeed; Habeenka iyo maalintu aday kuu shaqeenayaan ee ku shaqeyso. Badhkaaga ayay qaadanayaan ee adna ka qaado kana faa'iideyso.

4

ILLAASHO WAKHTIGA AAD HAYSATO

Mid ka mid ah hibooyinka eebe inagu mannaystay ee tiro beeley, waa wakhtiga.

mid ka mid ah nimcooyinka ay bulshadeenu dayacday waa wakhtiga.

Mid ka mid ah arrimaha lays waydiindoono maalinta qiyaame waa wakhtiga.

Qiimaha wakhtiga, maqaal lagu soo koobi kari maayo, balse aan qalinkaygan dahabiga ah ku dhigo ereyo kooban oo ka hadlaya qiimaha wakhtiga iyo sidii qofku u maareynlahaa.

Wakhtigu waa mid ka mid ah nimcooyinka iyo hibooyinka qaaliga ah ee ALLAH mooyee aanay cidkale bixin.

Wakhtigu waa hanti hadii ay mar ku dhaafto aan dib loo heli karin, waxaa la yidhi *"wakhtigu waa nolosha iyadoo laga cabirayo qiimihiisa aan wax loo dhigaa jirin"*

Waxaa la yidhi, (*Time is money*) "wakhtigu waa lacag" iyadoo laga cabiraayo qiimaha uu leeyahay.

Waxaa la yidhi, "wakhtigu waa sida seefta hadaanad goyn isagaa ku goyn"

iyadoo laga cabiraayo socodkiisa iyo oradka aan joogsiga lahayn ee uu ku jiro.

ALLAH ayaa marar badan ku dhaartay wakhtiga jeer uu yidhi, taasi waxaa ay kuu bildhaaminaysaa qiimaha uu wakhtigu leeyahay illeen shay uu ALLE ku dhaartay waa mid qiimo badane. Gabyaagii carbeed ee gabyey waxaa uu yidhi oo macne ahaan ah "garaaca wadnaha qofku wuxuu farrin u dirayaa qofka laftiisa, isgoo leh noloshuba waa daqiiqado iyo ilbidhiqsiyo".

Nebigeenii suubanaa NNKH, waxaa uu yidhi,

"laba nimco ayaa dadka badidiisu mooganyihiin: caafimadka iyo firaaqada".

Diinteenuna aad ayey ugu nuuxnuuxsatey dhawrista qiimaha wakhtiga.

Balse waxaa ayaan darro ah, in bulshadeena soomaaliyeed ee maanta nool, ay dayaceen qiimaha wakhtiga. Badanaa inta jeer ee aad marto waddo oo aad aragto dhallinyaro badan oo fadhiya gidaarada iyo kaabadaha, badanaa inta jeer ee aad aragto dhallinyaro saacado badan ku lumiya maqaayadaha iyo shaashadaha tiifiiyada, badanaa badanaa!!. Waxaase ka sii daran in dad badan ay ku kelliftay dayacaadda wakhtiga iyagoon garaneyn habkii ay u maali lahaayeen wakhtigooga oo ay u maamuli lahaayeen.

Ma jecelshahay in aad wakhtigaaga mareyso?

Ma jeceshahay in aad beerato wakhtigaaga maanta si aad midhahaas u ga gurato berrito?

Bal aynu jawaab u helno, sidee wakhti loo maareeyaa:

Ugu horreyn ogow wakhtigu waa ma doorsoome, taas waxaan uga jeedaa, innagu wakhtiga ma kordhin karno mana dhimi karno, qofwalba wuxuu haystaa 24 saacdood ama 1440 daqiiqo amma 86400 ilbidhiqsi. Si aad u maareyso wakhtigaaga raac tilmaamahan:

1. Ku xidhnow ALLAH oo u dhiibo arrinkaaga: ma rabtaa ballan qaad ah, in ALLAH kuu dhawro dhammaan arrimahaaga?
2. Ku dheg oo qabso xadhiga ALLE.

3. Yeelo hadaf iyo yool: hadii aanand hadaf lahayn, wax aad u nooshayba ma jiro, sidaas la ajligeed waxa aad wakhti u maareysaaba ma jirto.
4. Sameyso wakhti aad qorsheyso wakhtigaaga: u qorshee si joogto ah, qorsheyntaada ha la socoto dabagal joogto ah iyo isxisaabin. Isticmaal aaladaha kaa cawinkara arrinta sida, (Todo list) iyo waxii la mid ahba.
5. Mudnaanta sii kolba arrimaha muhiimka ah: ha isku dhexyaacin, arrimuhu iskuma jiraane kala hormee, waxaa jira wax la dhaho (*Time management matrix*) oo kula saarta arrimaha afar waaxood oo waaweyn oo kala ah

    1. Arrimo muhiim ah balse aan degdeg ahayn,

    2. Arrimo degdeg ah balse aan muhiim ahayn,

    3. Arrimo aan muhiim ahaynd degdegna ahayn,

    4. Arrimo muhiim ah degdegna ah).

6. Jooji dib u dhigista: waxaa ay dhaheen

    (*procrastination is the thief of time, collar him),* oo macne ahaan ah " dib u dhigistu waa tuuga wakhtiga ee xidh", waxaa ay ku maahmaaheen ingiirsku, (wax aad maanta qabankarto berrito ha u dhigan)

7. Iska jir tuugta wakhtiga: waxaa kamid ah saaxiibada, internetka, TV-ga IWM. Samayso siyaasad kuu gaar ah oo aad ku hagto dhammaantood, iskana jir yaaney wakhtigaaga cadow ku noqone.

5

QORSHAYNTA WAKHTIGA

Maaraynta Wakhtigu (Time Management) waa hanaan aasaasi ah oo u baahan, la qabsasho, tababar, xirfad, agab, iyo qaab shaqo isku xidhan oo kugu caawinaya

inaad qiimo badan siiso koro u qaadista tayada wakhtiga noloshaada.

Muhiimada inaad wakhtigaaga qaabaysaa micnaheedu maaha wax-qabad badan oo aad samayso, maxaa yeelay waxaa taas ka mudan inaad ku hawlan tahay tacab midho-dhal leh; in juhdiga iyo dadaaal kaagu ku wajahan yihiin jahada saxada ah.

Haddii aad wakhti lumis tahay waligaa kob cagaar leh ka soo durdurin maysid. 10 ka qodobka dooro inta kaa anfacaysa, kuna dadaal inaad fuliso oo aad caado ka dhigato ka faa'iidaysiga bar kasta oo wahtigaaga ah.

1. Qor oo qaabee amuuraha:

Qaladaadka guud ee qorshaha wakhtiga haleeya waxaa ka mid ah inaad isku halayso xasuustaada oo aad macluumaad badan ku kaydiso taas oo ugu dambayn buux dhaafisa maskaxda, wax badana aad iloowdo. Inaad liis garayso oo qorto shay kasta waxay kuu awood siinaysaa inaad xadido wakhtiga mashaariicda iyo amuurahaaga adiga u fullinaya si abaabulan.

2. U kala gur siday u kala mudan yihiin:

Waxaa la yidhi oodo dhacameed siday u kala sareeyaan ayaa loo kala guraa. Waa lagama maarmaan inaad u liis garayso sida amuuruhu u kala mudan yihiin adiga oo diirada saaraya wakhtiga aad ku wajahayso xaajooyinka sida dhabta ah u saamaynaya mustaqbal kaaga. U calaamadi liis kaaga siday u kala horeeyaan (*prioritising the importance ABCD*).

3. Qorshee usbuucaaga:

Wakhti sii bilawga usbuuca kasta qorshaynta jadwal kaaga. Wakhti dheeraada inaad tan siisa waxay kaa caawinaysa sare u kaca wax soosaar kaaga iyo dheeli-tirka mashaariicda mudada dheer leh iyo kuwa muuhimada gaarka ah leh. Waxaa kaliya oo aad u baahan tahay 15 ilaa 30 daqiiqo oo aad ku qorshayso wiigaaga.

4. Ku dhaganoow Boog-yare haaga (notebook):

Ma ogid goorta ay kugu soo dhici karto fikrad wanaagsan ama qorshe qiima lahi. Waa inaad sidato bug-yare markasta oo aad baxayso si aad u weelayso arragtida cusub. Haddii aad sugto waxooga waxaa laga yaaba inaad ilawdaba. Waxaad kalo isticmaali karta inaad digital recorder ku kaydasto macluumaadka (hadaad haysato).

5 Baro inaad maya tidhaahdo :

Marar badan ayaynu la khadyaanaa mashquul dartii sabaabta oo ah waxa aynu balan qaadnay ee ina sugaya inaynu fulino iyo waxa aynu qaban karo ayaa kala badan; waxa aynu nidhaahnaa haa iyada oo ay runtu maya ahayd. Baro inaad maya tidhaahdo wixii

aan daruuri ahayn si aad wakhti ugu hesho kuwa muhiimada leh.

6. Inta aanad falin ka fiirso:

imisa jeer ayaad balanqaaday wax aad hadhaw ka qoomamaysay? Inta aanad balanqaadin mashruuc cusub, waa inaad si qoto dheer uga fiirsataa wakhtiga uu u baahan yahay. Tani waxay kaa xijaabaysaa shaqo badan oo aanad u daaqad hayn.

7. Joogtee kobcinta aqoon taada:

   Jadwal kaaga ku darso wakhti aad wax cusub ku barato si aad ku horumariso awoodaha dabeeciga ah ee Eebe kugu galaday iyo kalsoonidaada shaqsinimo. Aqoontu ma dhamaato, heer kasta oo aad wax barashada ka gaadhana wax uun baa kaa dhiman, isku day inaad wax korodhsato. Tusaale ahaan, waxaad maalintii saacad xaadiri kartaa tasfiirka quraanka.

Waxaad saacad siin kartaa akhriska buugaagta iyo magazine-da aad jeceshayay (khasatan kuwa la xidhiidha field kaaga).

Horumarka aqoon taada iyo xirfadaadu waxay kor u qaadaysaa hal-abuurnimaada, waxay quwaynaysaa darajadaada shaqo, waana wax halkii aad tagtaba kugu anfacaaya. Haddii aanad wax baranayn adigu wax bar oo dadkaaga uga faa'iidee aqoontaada. Wixii aad bartaaba (Amxaari-na ha ahaadee) way anfacaysaa, waa sadaqo jaariya, sharafna waabay kuu tahay.

8. Dib u qiimee wixii wax ka badel u baahan xarakaad kaaga:

Waa fikrad wanaagsan inaad joogtayso qiimaynta sida aad u isticmaalayso wakhtigaaga. Sidaa darted, way fiican tahay inaad jadwelka ka saarto wixii u muuqda inaanu midho dhal lahayn ama aan u adeegayn danahaaga si aad wakhtiga ugu buuxiso mashruuc kale oo ka qiimo badan.

9. Calaamadi caadooyin kaaga liita:

U samee liis caadooyin kaaga liita ee wakhti gaaga galaafta, curyaamiya horumar kaaga, ee daboola guulo aad gaadhi lahayd. Marka aad aqoonsato, u hawl gal sida ugu macquulsan ee caadada aad walaftay aad uga samota bixin lahayd naftaada. Ogsoonoow sida ugu sahlan ee aad caadooyinka xun ku jari kartaa waa adoo qaar wanaagsan halkooda ku buuxiya.

10. Hayso himilo aad hiigsanayso (a goal journey):

    Markasta waa in hadaf iyo meel aad hiigsanaysa oo ugu saraysaa ay jirtaa. Samee buuga hadafka, (a gaol journal) oo qor talaabo kasta oo aad xaga horumarka u qaado.

Ugu yaraan halmar usbuucii booqo xasuus-qor kaaga oo hubi inaad ku taagan tahay jidkii saxda ahaa Toban kan qodob waa qaar qofkii joogteeya u suurto galinaya inuu wakhtigiisa uga faa'iidaysto sida ay tahay. Fadlan mar walba maanka ku hay in wakhtigu yahay waxa ugu qaalisan hantidaada.

Ogoow, daqiiqaddii ina dhaaftaa ma soo noqoto badalkeedana ma helo, cimrigeena uun baanay ka go'antay Wixii aad maanta qabsan karto bari hawdhigan Aakhirona waa lama huraankiiye isku day inaad cibaadada IlLaahay u hogaansanto. Illahoow toobada nagu noolee oo nagu dil. Aamiin.

6

XASILOONIDA WAKHTIGU WAA FARXAD

Af soomaali ahaan Farxad eray ka xeel dheer oo sheegaya macnaha dhabta ah ee aan uga dan leenahay waxa igala habboonaaday erayga “Xasilooni” oo aan is idhi isagaa ujeeddo ahaan uga dhaw erayga Af-carabiga ah ee “Asacaada ” Sidaa darteed waxa lagama maarmaan ah in aynu qeexno si ujeeddada aynu rabnaa inoogu iftiinto…

Guud ahaan waa dareen, Saddex siyaabood oo kala duwan kugusoo mara. Taas oo ku xidhan xagga wakhtiga iyo kolba muddada aad dhex mushaaxdo dareenkaas. Ka u horeeyaa waa farxad yar oo kooban uun; Ka labaad waa markaad wakhti dheer hesho farxaddaas; ka u dambeeyaana waa ka kula noolaado inta ugu badan nolashaada, waana ka ugu wanaagsan.

Tusaale:

- Mar waa raaxo uun:
- sida adiga oo gaajo qabay, oo cunto helay;
- adiga oo haraaddanaa, oo biya cabbay;
- adiga oo luloonaayay, oo hurdo seexday;
- Iyo baahiya kale oo la mid ah oo dhammaantood ku eeg markaad hesho wax ku baahi tira.

  Marna waa farxad gaaban: waa mid kaa hore kasii yara badan.

- Waa waxaad dareento marka aad gaadhi cusub iibsato, guri aad dhisato, shaqo aad hesho; marka aad qalin-jabiso, marka aad guursato iyo waxyaabaha la midka ah.

  Marna waa Xasilooni joogto ah: Dareenka noocani waa markaad ku xasisho farxadda muddada ugu dheer. Amaba inta aad nooshahay.

- Waa mid ka xeel dheer kana wakhti badan kuwii hore.

Waana nooca u dambeya oo ah ta aynu u dan leenahay.

Waa wax goorkasta iyo goob kasta aad haysato waa WAKHTIGA, Waa halka ay qormadeenu u socoto iyo farxadda aynu ka hadlayno.

Waxyaabaha lagu garto in aad ku sugantahay dareenka noocan ah waxa ka mid ah:

Waxaad noqon qof ku qanacsan wax kasta oo uu haysto kana faaideysta wakhtigiisa,Kuna sabra xaalad kasta oo uu ku jiro,una dul qaata dhibka, gafka iyo qaladaadka kaga imanaaya deegaanta iyo dadka ku xeeran.

Waa midda kaa dhigta qof isku kalsoon. Allihii abuurtay iyo diinta islaamkana si dhab ah u aaminsan.

Farxaddu waa mid ka mid ah watigaaga ood ka faaideysatay kan agaray natiijooyinka guusha.

Waa waxa dhadhan iyo macno u sameeya wax kasta oo kale oo aad haysato; hadday tahay Maal, Magac iyo Mansab intaba. Kuuna suurta galiya in aad ku raaxaysato wax yar iyo waxa badan labadaba.

Faqiirka aan hanti kale lahayn iyada mooyaane; wuxuu ka ayaan badan yahay taajirka xoolaha badan haytsa

laakiin ka aradan farxad iyo wakhtiga wangsan uu haysto gaari karayaan inuu noqdo qof ka guuleysta dadka .

CAQABADAHA WAKHTIGA FARXADA

: Haddaba waxa jira waxyaabo kaa hor istaaga ama kuu diida in aad hesho, sidoo kale haddii aad heshana waxa jira waxyaaba kale oo ku seejiya farxaddii aad heshay. Waxaana ka mid ah Caqabadahaas:

1. **Murugada:** Inaad ka murugooto tagtada iyo wixii aad soo dhaaftay; adigoo ka ciishoonaaya am ka shalleenaya waxyaaba ay ka mid yihiin imtaxaan aad dhacday, wax kaa lumay, qof bari ku xumeeyay iwm.

Waa adigoo naftaada ku canaanta waxyaabahaas oo yidhaa maxay sidaasay iigu dhacday; haddaan sidaa sameyn lahaa sidaas may noqoteen, waxaasoo dhan waxa u sabab ah ama iigu wacan hebel ama heblaayo… sidaa daraadeed adoo tix
raacaya Odhaahdii soomaaliyeed ee ahayd “wax tagay tiigsimaad ma leh”. Ogsoonow in aanaad soo celin Karin wakhtigaas. laakiin waxaad heysata fursad aad imaka ku

sixi karto waxaad hore u qaladay. Kagana digtoonaan kara godkaad hore ugu dhacday.

Taladu waa haddeer iyo kolba wakhtigaas la joogo. Wixii tagay kaliya ha kuu noqdo macalin aad duruus ka baratay. Waxaad ka baratay dariiqooyinka lagu fashilmo taas oo hadda kuu suurta galinaysa in aad ka leexato oo aanaad mar dambe qaadin jidkii horee guuldarrada. Markaas ayaa la odhan karaa waad ka faa'iideysatay wixii aad soo dhaaftay. Waaya aragnimada iyo khibrada ugu fiicana waxa ay ka yimaadaan nolasha hore ee leh xanafta iyo tuuraha. Sidaa daraadeed fursado kusoo maray ayay ahaayeen waxaas kuula muuqda caqabadaha.

1. wal walka: Inaad ka cabsato waxa kugusoo food leh sida: Fashil, Cudur, Dhimasho, Shil iwm.
   Markaas ayaad weydaa dareenkii kaa dhigaayay qof deggan, Waxaase is weydiin mudan haddii aynu ogaan lahayn waxa soo socda (qaa'ibka) sidee ayuu dareenkeennu noqon lahaa waxa hubaal ah in aynu mar kasta cabsi ku jiri lahayn sababtoo ah waxa maqan waa laba mid uun wax togan ama kuu wanaagsan iyo wax taban ama aan kuu fiicnayn Qalbigeenna wanaaga iyo xumaanta waxa kusoo hor dhaca xumaanta

Markaa waxaad noqon lahayd mid aan arkin inta fiican ee kaliya sii daalacda inta xun ka dibna war war ku noolaada had iyo goor. Alle –subxaana wa tacaala- wuu inaga qariyay arrimahaas, si aynaan iskugu mashquulin waxa iman doona. Waxa quseeya joogtada iyo kolba daqiiqada aad ku sugantahayna aad ku foogganaato. Wax qabso markaas ay kula gudboontahay siina qorshee timaadada, wixii dhicina Alle u daa. Laakiin khayr iyo wanaag ka filo mar kasta.

Abwaan xaaji aadan afqaloocna "AHU" waa kii lahaa

- Saben tagay mid soo socdiyo saaka waxa jooga
- Saddexdaa wakhtibaa xaal adduun lagu sifeeyaa
- Soo noqod ma jiro shalay wixii saadufoo dhacaye
- Waxa saadambeetiyo berrina, waa su'aal maqane
- Waxay taladu ku suubantahay subaxaa aad joogto …

3. Cadhada: wax aka mida sidoo kale waxyaabaha kaa hor istaaga in aad ku noolaato farxadda middeeda heerka sare ah. In aad ka cadhooto waxa kolba markaa kugu dhacaya waa dareen qof walba uu dareemo. Waxyaaba kala duwan ayaa dhaliya, natiijooyin kala duwanna way kasoo baxaan.

Waxa dhacda cadhada wixii keenay inuu wax yar ahaa balse natiijadii ka dhalatay ay wax weyn noqoto taas oo ka tagta raad iyo xasuus lama ilaawaan ah.

Sheekadan yar ayaana inoo iftiimin:

Wiil yar ayaa ahaa mid aad u cadha badan. Markuu cadhoodana dadka wuxuu kula hadli jiray kalmado aan wanaagsaneyn.

Maalintii dambe ayuu aabihii ku yidhi “Aabo ma doonaysa in cadhadu kaa ba’ado”?

Wiilkiiba yidhi “haa aabe”.

Aabihii baa ku yidhi: “Waxaad sameysaa gidaarka beerteena ku wareegsan maalin kasta xabad musbaar ah

ka tag”. Wiilkii muddo ayuu sidii sameenaayay. Bil ka dib ayuu aabihii ku yidhi: “aabe wali cadhadii igamay tagin gidaarkiina maalin walba musbaarkii waan ku taagaa…

” Aabihiibaa ku yidhi: “waxaad sameysaa dhammaan masaabiirtii aad ku taagtay gidaarka dib uga soo wada gur”.

Wiilkii sidii ayuu sameeyay. Aabihii ayaa ku yidhi “aabe fiiri masaabiirtii gidaarkii waxa ay kaga tageen raad iyo dal daloolo. Waligoodna kama ba’aayaan.

Sidaas oo kale mar kasta oo aad cadhooto dadka erayada aad ku tidhaa waxa ay ku reebayaan qalbiyadooda raadad sidaas oo kale u fool xun”.

Cadhadu inta badan waxa ay sababtaa dagdag iyo in aad qaadato go’aano qaldan; taas oo laga yaabo nolashaada ama qof kale nolashiisa in aad waxyeelo weyn ugu geysato. Ka dibna mar dambe aad ka shalleyso.

Cadhada badan waxay kuu geysan kartaa waxyeellooyin caafimaad. Waxay burburisaa qosyka. Waxay kugu dirta saaxiibkaa. Waxaad ku weydaa shaqadaada.

Cadhada waxa aad kaga hor tagi kartaa dulqaad, iyo inaad masuuliyad isa saarto oo aad naftaada eersato.

Haddii aad iska dareentana, si aad markaba uga hor tagto isku day in aad sameyso talaabooyinkan:

baddal kolba xaaladda aad ku sugantahay haddaad taagnayd fadhiiso. Neef xoog ah sanka ka qaado ka dib afka kasoo saar si aadyar aadyar ah,Qur'aan akhriso, weysana qaado.

Nin ayaa u yimid Nabiga–calayhi salaatu wa salaam-wuxuu ku yidhi nabi Allow ii dardaaran.

Nabigu wuxuu ku yidhi: "Ha cadhoonin".

Mar kale xadiis Nabiga "csw" lagasoo wariyay wuxuu ku sifeeyay cadhada inay tahay "dhuxul dab ah oo gubaysa qalbiga".

Sidaa daraadeed mar kasta oo aad cadhooto adiga ayaa naftaada wax yeelaaya ee cidna waxba ku yeeli maysid.

Allana wuxuu jecelyahay kuwa wanaaga sameeya waxaana ka mid ah kuwa cadhadooda qarsada, dadkana iska cafiya.....

isku soo duuboo Murugada, warwarka iyo cadhadu waxa ay ka mid yihiin cadawga ugu daran ee kaa hor istaagi kara in ay naftaadu xasilooni buuxda hesho goor kasta.....

Sheekooyinkan waxaynu ka dhaxlaynaa inaynu waqigeen kuxissabtano ka fogaano wax kasta o inagu ah qoomamo iyo inaad kwaydo farxadaada iyo guulo aad gaari lahyd

7

KALSOONIDA NAFTA

Qofku in uu naftiisa ku kalsoonyahay waa midda ka dhigta mid cid kalena ku kalsoon ama isaga cid kale ku kalsoonaato. Naftaada oo aad xaqirtaa waa bilawga jabkaaga. Qofka aan naftiisa ku kalsoonayn go'aan ma qaadan karo, dhib ma xallin karo, naftiisu ma xasisho, guulna ma gaadhi karo.

Kalsoonida naftu waa inta aad aaminsatahay ama aad rumaysantahay awoodaha Alle (swt) uu ku siiyay iyo nicmooyinka faraha badan ee aad haysato. Haddii adigo oo wax sameyn kara aad u malayso in aanaad waxaa awoodin, taas macnaheedu waa kalsooni darro kaa haysata naftaada.

Kalsoonidu waa hubka ugu mudan ee uu u baahanyahay qof kasta oo raba in uu sameeyo is badal kana tago nolol iyo heer una guura mid ka qurux badan kana heer saraysa taa hore.

Waana agabka ugu muhiimsan in uu dhiso qof kasta oo raba in uu guuleysto.

Kalsoonidaadu kolba inta ay leegtahay ayay farxaddaaduna tahay.

Dhawr arrimood ayaynu ku dareemi karnaa in qof ama adigaba xaaladani kulasoo daristay waxaana ka mid ah:

Qofka oo aan ku qanacsanayn muuqaalkiisa,

Qayb ka mid ah xubnaha jidhkiisa ama ficiliadiisa sida: qosolka, codka, dhererka, midabka, socodka.

Waxa ka mid ah qofka oo aan rumeysanyn in uu u qalmo inuu gaadho meel sare ama uu qaban karo hawl gaar ah; ka dibna wax kasta ku riixa qof kale oo uu is leeyahay waxan ayuu kaaga habboonyahay; iyada oo aanay ka ahayn taageero uu qofkaas uun uu u hayo balse ay ka tahay; isaga oo is leh adigu uma qalantid waxaas ama meeshaas.

Waxa ka mid ah cabisada joogtada gaar ahaan in uu ka baqo mustaqbalka, guusha, fashilka iyo waxyaabaha kale ee ku xeeran; taasoo ka hor istaagaysa in uu adeegsado kartidiisii. Waxa ka mid ah qofka oo isku deygiisu aad u yaryahay. Haddii uu isku dayana caqabadaha u nugul oo markaba niyad jaba. Joogteyn la’aan ay sababtay aaminaad darro ka haysata in uu shaygaas ka midha dhalin karo.iwm.

Waxa jira waxyaaba kalsoonidaada hoos u dhigaaya iyo kuwa kale oo sare u qaadaya. Kuwaas oo kaaga baahan in aad mar kasta fiira gaar ah u yeelato kana digtoonaato.

Waxa kor u qaada: Waxa ka mid ah:

ü inaad sameyso tijaabooyin sida in aad dajisato yool aad hiigsanayso ka dib aad jaangoyeso qorshayaal iyo himilooyin fudfudud oo aad u xadidaday wakhti ka dib aad ficil ku darto si aad ugu gaadho yoolkaaga. Mar kasta oo aad dhanka hiraalkaaga talaabo u qaado waa mar kasta oo aad naftaada wax badan aamiinto. Jidka yarina ka weyn ayuu kugu ridayaa. Illaa aad mashaariic iyo hawla waawayn aad marka dambe ku dhiirato hawl yaraana aad ugu guuleysato in aad kor u qaado hankaaga oo mar walba meesha aad joogto hadda, barri aad hoos usoo eegto adigoo haddana sii hiigsanayaa halkaa aad gaadhay meel kasii horeysa. Ha ka ficil qaadan ka kaa dambeeya, hana la tartamin kan kula midka ah ee hortaada eeg markasta iyo kolba ka kaa horeeya.

U waxa kale oo ka mid ah baadhitaanno aad ku sameyso dadka nolasha heer ka gaadhay gaar ahaan kuwooda laxaadka la'. Inkastoo lagu tilmaamo in ay naafo yihiin, marka aad aragto noloshooda sida ay u maareeyeen iyo sida ay u gaadheen wax kasta oo ay hiigsanaayeen waxa

aad ogaanaysaa in naafadu ay ka duwantahay lixaad aad beeshay balse ay tahay adigoo dhamaystiran oo haddana adeegsan waayay awoodaha Alle ku siiyay.

Waxa kuusoo baxaysa dadkani in ay kula mid yihiin qaarkoodna aad kaba fursad badantahay marka loo eego waxa ay haystaan ama halka ay nolasha ka bilaabeen.

Waxa hoos u dhiga: waxa ka mid ah:

Adiga oo dhagta la raac raaca erayada hoos u dhigaaya hankaaga ee kaaga imanaaya qaar ka mid ah ehelkaaga, ama asxaabtaada. Adiga oo dhagaysta erayada taban ee gudahaaga kasoo baxaaya kuwaas oo ay ka mid yihiin: Hebel iyo heblaayaba way iska noolyihiin waxna ma sameeyaan ee adiguna iska nooloow uun. Adiga oo ka baqa fashil kugu yimaada. Xirfadaaha aad adeegsanayso oo liita. Iyo iimaankaaga oo hoos u dhaco.

“ Damacaaga fogee, oo ha dooran xumaanta
Duruusta nolasha, duruufaha ka dhex raadi
Ka dheerow dadkana, ka dillaaya hankaaga
Wixii aan dambi layn, ha u daymo la’aanin….”

Imaankaagu haddii uu siyaado waxay ka dhigantahay kalsoonidaada ayaa badatay. Kalsoonidaadu haddii ay badatana naftaada ayaa xasishay. Ka dib waxa aad ku guuleysan kartaa wax kasta oo aad u dhaqaaqdo.

Hore u soco sidii wax dhaga la' oo aan maqlahayn hadalada iyo dhacdooynka niyad jabka kuu keenaya. Waxa kaliya ee kusoo xidho ha noqdo Diinta Islaamka oo ay asaas u yihiin Qur'aanka iyo Axaadiistu. Wixii aad taqaan ku dhaqan, wixii kalana la kaasho inta ehelka u ah.

Waa hubaal in aad wax badan jiritaankaaga iyo naftaada ku qanci oo aad rumeysan; marka aad ruuxdaada nooleyso kuna noolayso Alle ka cabsi, xus, ducooyin, Qur'aanka oo aad u fiirfiirsato, akhrinta qisooyinkii anbiyada, siiradii Nabiga (csw), taariikhdii islaamka. Sidoo kale aad is raadiso oo aad is soo hesho qofka aad tahay,

Sababta aad u jirto waxa laguu abuuray iyo waxa adiga gaar Alle kuugu galaday ee hibo ah.

Diinta waxa aad ku baratay in Alle aadanaha uu siiyay awoodo badan, in adduunka uu u keenay inay isaga uun ku caabudaan, wanaagna ku cammiraan oo ay iyagu maamulaan; wuxuuna u sakhiray dhammaan abuurkiisa kale. Mar kale waxaad ka dhex helaysaa adiga shaqsiyadaada gaarka ah Alle nimcooyinka uu ku siiyay

ee qalbiga, lixaadka, hibooyinka iyo maskaxadu ka midka yihiin. Waxaad ogaanaysaa in Alle dadkiisa cadaalad u sameeyay hadday tahay dhanka kartida iyo hadday tahay dhanka wakhtiga. Ka dib waxaad is weydiinaysaa haddiiba qof uu wax awoodo in adiguna aad awoodo isla waxaas. Laakiin waa goorma waa marka aad la timaado dadaalkii uu la yimid qofkaasi mid la mid ah am ka badan.

Is weydii su'aalahan si' aad naftaada u tijaabisid qudhaadu heerka ay kalsoonidaadu tahay:

- Ma laga yaabaa in aad sameysid xilliyada qaar wax aanay naftaadu raali ka ahayn, si aad dad kale ugu farxad galisid?

- Ma waxa ku dhiiri galiya uun, Malaha ay dadka kale kaa qabaan iyo kolba sida ay kuu arkaan?

- Markay wax kuu qabsoomi waayaanba, ma horaad ka niyad jabtaa, waanaad is dhiibtaa?

- Ma waxaad ku tamirisaa uun, faallooyinka iyo kolba intaad cajab galisay?

- Markaad qalad samaysaba, naftaada miyaad ugu yeedhaa erayada ay ka midka yihiin, waxaan ahay: Doqon, wax ma tare, dulli iyo kuwa la mid ah?

Haddii dhammaan aad HAA, kaga jawaabto; Kalsoonida naftaadu waa mid u eeg in ay hooseyso. Waxaad se haysataa fursad aad kor ugu qaadi karto haddeer.

Guud ahaan natiijooyinka kalsoonida waxaa ka mid ah: Geesi nimo, go'aan gaadhid, guul iyo farxad. Waxaad noqon qof isku arka in uu yahay muhiim. Dadkuna ay u baahanyihiin, wax badana qabsan kara dadkana u qaban kara.

Waxaad qaadan go'aano toosan kuwaas oo dhammaan kugu ridaaya jidka hiraalka kuu dajisan goor kasta. Wax badan ayaad ka gun gaadhi waxaanaad kasoo hoyn guullo badan dhan kasta oo nolasha ka mid ah. Waad xasili oo waxaad dareemi reyn reyn. Waxaanaad ogaan in aa tahay qof jira wax badanna sameyn kara sababtoo ah waxaad ogaatay in aad ka mid tahay hoggaankii adduunka. Odhan maysid waxaa ma aqaan ee waad baran, Odhan mayasid suurta gal maaha ee waad tijaabin.

Sidoo kale odhan maysid ma awoodo ee waad isku dayi.

Kaska ood ku hayso inaad korto buurta

Kow waxa ka ah inaad gaadho korkeeda

Adoo ku kalsoon kartida eebbe ku siiyay

Waxad mararka qaarkood moodaa in dadbadani aanay ogeynba muhiimada ay kalsoonidu leedahay, iyo doorka weyn ee ay leedahay.

kalsoonidu runtii waa awooda koowaad ee nafta hogaamisa kuna dhiiri galisa fal kasta oo ay qabanayso.

Waxa lid ku ah kalsoonida Kalsooni daradda oo Hadii qofku aanu kalsooni lahayn runtii ay ku adagtay in uu nolol fiican ku noolaado inta uu aduunyada joogo waayo, kalsooni daradu waxay leedahay mushkiladao badan sida cabsi badan oo nafta u timaada markastaba, wax kastana uu ka shaki qabo warwer iyo walaac farrabadan, go'aan

la'aan aanu marnaba go'aan gaadhi karin kalidii una baahanaya in uu dad badan oo kale kolba wax waydiiyo.

XIRFADAHA KALSONIDA LAGU DHISO

Xirfadaha kalsoonida lagu dhiso Hadii aad ka shakido in ay kalsooni daadu yar tahay isticmaal qodabadan soo socda:

1. badso cibaddada Alle,
2. Yaree khaladaadkaga xaga bulshada dhexdeeda aad ka gasho ama Qooska iyo asaxaabta.
3. Hadii aad ku guuleysan wayday wax yaabo aad rabtay in aad gaadho mustaqbalka, niyada gali aduunyadu waa kaacaa kuf ee ha niyad jabin sii wadna waad gadhi doonta mar ay noqataba.
4. Marka aad doonayso in aad go'aan gaadho ama qorshe cusub samayeso ha ka tagin Xaqiiqda iyo sida suurtogalka ah mararka qaarkood waxa niyad jabka keena talo aan suurtogal ahayn oo aad gaadho.
5. Cabir naftaada tijabo na kusamee adiga oo xaqiiq ku socda tusaale ahaan imisa jeerbaad wax aad

qabankareysay aad ku fashilantay, Naftaada u cadee waxa aad ku fiicantay iyo waxa aad ku xuntay, aadbay muhiim u tahay in uu qofku ogaado naftiisa.

Inta aad tijaabada nafta ku jirto ogsonowna in qofna aanu dhameystirnayn lakiin naftaada kalsooni ku qab iyo nooca ay tahay barana dabeecadaha dadka kale ee ku gu hareeraysan, si aad faa'iido uga hesho aad waxna uga baratid.

8

ISBADALKA NOLOSHAADA

Hadii aad ku kalsoonaato shaqsiyadaada waad badali kartaa waadna u hogaamin kartaa guusha, Qofna ha u quudhin wax aanad naftaada u quudheen. Waxa run ah in sida aad u dhaqanto uun laguula dhaqmaayo.

Waxa aanad ogaataa in waxa aad iska dhigto uun aad tahay.

Ka fogow xaasidnimada, ha xisaabin wax aanad haysan. Tiri oo arag inta aad haysato oo keliya.

Qof kama dhigi kartid sida aad rabto, mana beddeli kartid, waxa aad beddeli kartaa dabeecaddaada, haddii aad miisaanto aragtidaa iyo sida aad wax u qiimayso dadka oo dhan waad is fahmaysaan, noloshaada oo dhamina waa ay is beddelaysaa.

Cadhadaada Maamul (Xakamee) haddii kale iyada ayaa ku maamuli doonta.

Dadka u calool debac, dhibta haysata la dareen, isbar garawshiyaha, waxa aan u jeedaa is bar naxariista, gobannimada, tixgelinta iyo u gargaaridda dadka baahan.

Naxariistu waxa ay dhistaa korna u qaadda qofnimada, waana huga ugu wacan ee qof isku qurxiyo.

– Bani'aadamka waxa lagu yaqaannaa damac badni iyo danaystenimo, waxa u caado ah in haddii hawl loo diro uu is waydiiyo..

MAXAAD KA FAA'DAYSAA?

MAXAA DAN AH EE KUUGU JIRA..?

miyaanad dareemin Shaqo kasta oo Ilaahay uu faray dadka in uu u balan qaaday Abaal marin.

Isbar dabeecadda ah cid kasta oo hawl kuu fulisa ama dan kuu qabata in aad uga abaal guddo, adiguna waajibaadka aad qabanayso abaal aadame ha ku sugin.

Astaaamaha muujiya Walaalnimada, Gacaltooyada iyo Saaxiibtinimada waxa ka mid ah in la isu naxariisto, dhibta mid haysatana uu kan kale dareemo.

Qofna ha ku gargaarin Dhaqan xumo ama dembi.

Nasiib darro waxa aynu maanta arkaynaa arintan lidigeeda.

Waxa maanta dhib noqotay in qof aad ku qanciso camalka wanaagsan iyo wax-is-tarka. Shar iyo Khayr wixii aad cid ku gargaarto adna qayb ayaad ka tahay.

Cidna ha ku fiiqin hub (Qori, Baastoolad, Mindi, Budh iwm) xitaa haddii aad ku kaftamayso.

Ma Ogtahay in sababta noocan ah ay sannad kasta u -geeriyoodaan dad aad u fara badan… Maxaan hub ka sheegi xitaa waxaa badownimo xad dhaafa ah in aad fiiqdo ama dadka ku taagto Faraha, Qalinka, Malqaacadda iwm.

Haddii ay dhacdo in aad qof u dhiibto Mindi fadlan Weel ku rid ama wax ku duub, haddii ay ka fursan waydo in aad sideeda ugu dhiibto qaba afka oo daabka qofka u dhiib.

Ka dheerow ciyaaraha keeni kara khatarta.

Caruurta qaar ayaa caadaysatay in ay ku ciyaaraan dhagax tuurista (Shiidka) guryo badan iyo baabuur badan ayaa ay muraayadahoodii galaaftay dhagax tuurkaasi miyaanay ahayn in aynu ubadkeena ku barbaarinno dhibta uu leeyahay dhagax-tuurku, waxa iyana taas kasi

daran in dadka qaar ay ciidaha, Aroorsyada iyo Munaasabadaha

kalaba ay farxaddooda ku muujiyaan rasaas ridis. Arrintaasi waxa ay halis ku noqotaa amniga iyo xasiloonida deegaanka.

Ka waran haddii qofku uu isku sawiro haddii uu qabanayo shay danta guud ah sida, geed uu beerayo, dhiig uu ku deeqayo ama sadaqad uu bixiyey. Maan fahmin waxa qof ku kalifi kara arintan.

Ilaahay ayaa qofka ka abaal marinaya samofalka uu geysto iyo wanaag kasta oo uu qabto, waana aynu ognahay in Alle aanu u baahnayn in loogu muujiyo wanaagga aad fashay.

Istusnimo wax ha u iibsan, ha noqon dadka u iibasada dharka iyo qalabka xarragada si loo dareemo heerkooda dhaqaale. Ha ka mid noqon kuwa xafladdaha ama casuumadaha uu abaabula kaliya si loo arko ama la maqlo.

Iska ilaali su'aalaha faduulinimada ah sida,

Waa immisa Mushaharkaagu?

Immisa ayuu gurigan ama gaadhigani kuugu kiraysan yahay ama aad ku iibsatay?

Gurigan ma adigaa leh mise waa kugu kiro?

Immisa ayuu ninkaagu biil kuu siiyaa?

Waxa laga yaabaa in su'aalaha noocan ahi ay qofka diiqad geliyaan.

Waa in aynu barannaa dhowrista arrimaha qofka u gaarka ah.

Haddii aad tagto meelaha la isugu yimaado (Hudheelada cuntada, Maqaaxiyaha iwm.) oo aad aragto cid gaar u fadhida waxa laga yaabaa in ay sheeko gaara leeyihiin ee iska ilaali in aad la fadhiisato ama aad ag fadhiisato. Xitaa haddii aad garanayso, sidoo kale ma fiicna in aad weydiiso in aad la fadhiisan karto, waayo waxaa dhacda in iyaga oo sheeko gaar ah haystay ay ku qaadi kari waayaan oo ay kuu ogolaadaan in aad la fadhiisato, salaam oo meel gaar ah iska tag, markaa kadib haddii ay kuu yeedhaan arag. Ha isku dayin in aad sir dhegaysato, ha akhriyin waraaqaha iyo Dhukumantiga dadka kale, isha ha ku xadin wax cid kale haysato.

Dadka ilabaxa ahi waxa ay aad u daneeyaan ilaalinta danahooda gaarka ah, iska jir in aad eegto lambarka talefan qof kula fadhiya u soo dhacay, ama farriin loo soo diray, sidoo kale ha baadhin sawirrada ku jira talefanka qofka kale iwm.

Haddii aynu iska kaashan wayno la dagaalanka dembiga, Sharka iyo Macaasida midkeenna kama badbaadi doono, bulshaduna waa ay burburaysaa.

Waxa aan maqal ku hayaa in dalka Maraykanka uu ka jiro sharci loo yaqaanno ISKAASHIGA DERISKA. Oo ah in bulsho wal oo meel wada taallaa ay masuul ka yihiin sidii ay deegaankooda uga dhigi lahaayeen Goob Ammaan ah.

Iyaga ayaa ka Masuul ah ilaalinta xuquuqda midba kan kale. Waxa dhacda in ay dadka deriska ahi ay ilaaliyaan wixii aan cadiga ahayn ee ay dareemaan sida, in la ay qabtaan qof si xun baabuurka u dhexwada xaafadda, in ay ka wardoonaan haddii cod yaab lehi uu ka baxo guri deriska ah, in loo fiirsado wixii dhaqdhaqaaq ah ee saacad aan loo baran laga dareemo guri deriska ah, ama laydhka oo si aan loo baran uga baxay guriga. Waxa dhacda in qofkii xaafadda ka mid ah ee arka qof khashin ku qubaya meel aan loogu talo gelini uu qabto, ama xitaa ay xaafaddaasi booliska uga ashkatooto haddii dhisme aan deegaanka u fiicnayn laga dhiso. Waxaas oo dhan waxa ay si degdeg ah ula socodsiiyaan Booliska ama ciddii kale ee qaabilsan ammaanka. Waxaas oo war ah

ugama jeedo aynu ku dayanno Maraykan ama aynu duruus ka baranno cid aan inala diin ama dhaqan ahayn, waxa aan uga jeedaa Dhaqankani ma dhaqan Maraykanbaa mise waa mid Islaam..? Miyaanay innaga diinteena Islaamku ina farin Xuquuqda Deriska.

– Ha ku Kaftamin Cabsi gelin iyo Ka nixinta dadka: Waxa aan dhowaan maqlay in Gabadh waayeel ahayd dhakhtar loola cararay kadib markii Inan (Wiil) ay ayeeyo u tahay uu ka nixiyay iyada oo aan iska filayn kadibna uu wadnuhu istaagi gaadhay. Maxaa faa'do ku jirta ciyaar noocaas ah.

Iska jir wax kasta oo naxdin lama filaana ku keeni kara qof. Xitaa ma fiicna daawashada iyo ka sheekaynta filimada naxdinta iyo Argagaxa ah. Iska jir ka sasinta carruurta. Waxa aad u khatar ah inaad qof kaga bajiso Meel aad u dheer, Gudcur, Biyo, Dab, Dhiig, Cidla IWM.

Ogoo in wax aynu riwaayad u naqaannaa uu khalkhalin karo amaba uu galaafan karo qofka noloshiisa oo dhan.

– Waa in aad xaddidaa (Xakamaysaa) baahidaada jinsiga ah, inta aanay dabarka goosan guurso. Dhaqan xumada soo kordhaysa waxa ka mid ah in la arko nin ama gabadh xaas leh oo haddana aanay indhahoodu gafayn qof kastaoo bilic leh oo ay halacsadaan. Nasiib darradu waa in qaar badan oo inaga mid ahi aanay dhib u arkayn

arintan. Muxuu macno samaynayaa guurku haddii aanu qofka xakamaynayn.

– Haddii qof aad sheeko wadaag tihiin u arag in warka aad is dhaafsataan uu sir yahay. Xitaa haddii aanu kaa dalban in aad qariso. Haddii ay ka fursan waydo, inta aanad sheegin hubi sida uu u arkayo isagu.

– Qofna dabadiisa ha ka hadlin, waayo waa xantii ay diintu inoo diiday. Nasiib darradu waxa ay tahay, dad badan ayaa u haysta in xantu ay tahay qofka oo lagu sheego wax aanu ahayn (Been laga sheego). Xasuusnoow, qofka oo wax aan jirin laga sheegaa waa Masabid, (Hafar). Haddii waxa qofka laga sheegay ay yihiin runna waa Xan. Labada jeerba waa dambigii oo kolba magac qaatay.

– Dadku inta badan waxa ay wax ka sheegaan dadka ka maqan, laakiin ogow si kasta oo aad u qariso qofka aad xamatay si ayuun buu u ogaanayaa. Cid aan ahayn qofka aad xamatay kaama saamixi karto dambigeeda, ee cafis weydiiso.

– Haddii aad aragto qof wax xamanaya u muuji in aanad ka raali ahayn iyo in aanad rabin dhegaysigeeda. Cidina ma jecla qof xan badan. Ma ogtahay, qofka warka kuu keenaa in uu adna kaa qaado.

– Iska ilaali in aad faafiso war (Sir) aad cid kale ka ogaatay. Haddii ay khasab noqoto in aad sheegto arrintaas iska ilaali in aad cid magac-dhowdo.

– Haddii aad sida saxda ah aaminsantahay, oo aad ogtahay in wax Ilaah kuu qoray oo kali ahi kugu dhacayaan, maxaad wax u karaahiyaysan ama qof u baasaysan. Ka fogow isticmaalka ereyada karaahiyaysiga sida, Shidh, (Shit), Ish, Uf, iwm.

Waxba ha karaahiyaysan waligaa, xayawaanna ha ahaato ee Haddii uu qof ku caayo ama uu si xun kuula macaamilo, markiiba ha aargoosan, ogow haddii qof ku caayay adna aad cay ugu jawaabto wax aad ku kala duwan tihiin ma jirto, oo aan ahayn in aad ku kala yara horayseen dambiga.

Hadyadda Aan dhamaan:

– Ha dayicin fursad aad qof kugu dheer ku gaadhsiin karto hadyada ama ugu yaraan Salaan qaaliya.

– Ha ka warwarin hadyad lagu siiyey yarideeda, muhiimaddu maaha qiimaha shayga ee waa in uu qofkani ku xasuustay kuuna muujiyey in uu kuu gacan furan yahay.

– Hadyaddu waxa ay beertaa Kalgacalka, waxa aanay kordhisaa Jacaylka.

– Hadyad aad cid siin lahayd ha la sugin Xaflad ama Munaasabad gaar ah oo aad bixiso. Mar kasta bixi hadyadda. Miyaanay qurux badnayn in aynu hadyad haba yaraato ee u qaadno marka aynu soo booqanayno Ehel ama Asxaab.

– Waxa aad ku dadaashaa in aad bixiso hadyadda Cimriga dheer leh, halkii aad casho ama Sharaab qof uga qaadi lahayd uga iibi shay sida, Shaadh, toob, Saacad, Kabo, Qalin IWM.

– Haddii aad ilma yar hadyad siinayso, sii wax mustaqbalkiisa wax tara, sida in aad ka bixiso lacagta waxbarashada ama in aad geyso dugsi fiican oo aad u doortay.

– Haddii hadyad laguu keeno ha u eegin in aad u baahantahay iyo in kale ee waxa aad u eegtada qiimaha kalgacalka uu qofku kugu xasuustay.

– Ceeb maaha in hadyad lagu siiyay aad u sii hibayso qof kale, laakiin ku dadaal in xitaa haddii aanad u baahnayn aad haysato hadyadda lagu siiyay qofka aad hadyadda siin lahaydna mid kale u raadi.

– Si kasta oo uu u xumaado xidhiidhka aad la leedahay qof mar hore aad hadyad siiysay dib ha ugagga noqon.

– Qof hadyad hore ku siiyay ha u celin haddiiba uu xumaado xidhiidhkiinu haddii ay ka fursan waydo in aanad haysan sii qof kale oo u baahan.

– Cadarka wanaagsan hadyad ka wanaagsani ma jirto ee la ogow cidda aad wax u hadyadaynayso.

– Haddii hadyad laguugu keeno Weel, Shandad ama shay aad celinayso ha Celin isaga oo madhan, haddii aad buuxin kari waydo, wax uun ku rid, laakiin ha ka duwanaado hadyaddii marka hore laguu soo hadyadeeyey.

Aragtida Fayow;

– Xaq ayaad u leedahay in aad qof wax ku khilaafi karto, laakiin adiga oo aan cadhoon qofkana hiifin sheeg dooddaada. U hadal sida ugu habboon ee ixtiraamku ka muuqdo, halkii aad ka odhan lahayd. “Waad khladan

tahay..” Maad tidhaahdid, “Ma xuma aragtidaadu, laakiin aniga si sidaa in yar ka duwan ayaa ay ila muuqataa…” Uma jeedo ka tanaasul wax aad hubto saxnaanshiyaheeda, waxa aan rabaa adiga oo aan cid weerarin in aad muujiso

muuji in aragtidaadu saxan tahay.

– Ha filan in dadku ay mar walba ku waafaqaan. Xitaa haddii aad hubto in aad saxantahay cid ayuun ku khilaafaysa. –

— Noqo qof dabacsan oo furfuran, dadka dhegayso, haddii aanad ku waafaqsanayn waxa uu ka hadlayo qofka kula hadlayaa, ugu jawaab si deggen adiga oo taaganna u jawaab, oo hadalka badhkii ha odhan marka aad dhaqaaqdo.

FAAHFAAHIN

Wixii tallo iyo tusaale ah fadlan iigu soo hagaaji

Email : uurmaax2010@gmail.com

Facebook : cabdiraxmaan cm

Twitter : cabdiraxmaan cm

Mobile : +25264982050/0906584037

Wabillaahi Towfiiq